



## Barnaamijka Tieto Edu, oo lagu talo galay waalidka caruurtoodu dhigato iskuulada.

Tieto app waxaad ku soo dejin kartaa telefonkaaga gacanta iyo taabka (taabka-yar) adiga oo isticmalaya App Store ka iyo Google Play ba. Tieto Edu waxaad ku galaysaa adiga oo isticmaalaha BankID. Hadii aad doonaysao in aad ka gasho kombiyuutarka waxad taabanaysaaa linkigan [www.kristianstad.se/skolsystem](http://www.kristianstad.se/skolsystem).

Barta bilowga waxaad ka arkaysaa magacaaga iyo kan caruurtaada sidoo kale qaabkii aad u isticmaali lahayd. Hadii aad leedahay caruur badan waxad u riixaysaa barnaamijka dhanka bidixda si aad ilmo kasta u aragto warbixintiisa. Ilmaahaga marka uu noqdo 18 sanno jir kama dhex arki doontid barnaamijka.

Halka aad ka maamuli karto barnaamijka oo ku taala xaga ugu saraysa dhanka midigta waxaad ka dooran kartaa luuqada aad doonayso sida Iswiidhish ama Ingiriisi.

### Halka lagaala soo xidhiidhayo

Halka aad ka maamuli karto barnaamijka oo ku taala xaga ugu saraysa dhanka midigta waxaad ka dooran kartaa "Macluumaadkayga. Halkaas waxa ku jira adarayskaaga guriga aad dagan tahay. Waa muhiin in aad ku qorto telefonkaaga aad isticmaasho iyo emaylkaaga in aad u saxdo meesha lagaala soo xidhiidhayo.

### Maqnaanshaha maamulkiisa

Maqnaanshaha "Habsanka" waa meel aad ka soo sheegi karto ilmahaaga maqnaanshihiisa isla markaana aad ka arki karto maqnaanshaha loo diwaan galiyay caruurtaada. Waa muhiin in aad maqnaanshaha ilmahaaga aad ogaysiiso adiga oo isticmaalaha barnaamijka Tieto Edu ka hor intaan wakhtigii uu ilmahaagu bilaabi lahaa. Maqnaanshaha waxaad ogaysiiskeeda bixin kartaa maanta ama beri uun.

Markaad dooranayso maqnaanshaha waxa jira saddex doorasho sida hoos ku qoran

- **Ogaysiiska-Maqnaanshaha:** Halkan waxa ku dirayasa ogaysiiska maqnaanshaha ilmo ama caruurtaada dhawr ka mid ah maqnaanshahooda. Waxaad tagaysaa bilowga (caruurta oo dhan) kadib waxaad calamadin kartaa ilamaha aad rabto, ama waxaad si gaar ah u sii gali kartaa ilamaha aad rabto.

Adiga waalidka ama ka masuulka ah ilamaha waxad galinaysaa halkan maqnaanshaha ilmaha maalin dhan (adiga oo dooranaya maanta ama beri) ama qayb ka mid ah maalinta (wakhti-go'an) halkaas oo aad ka dooranayso tariikhda iyo wakhtiga aad rabto. Fasaxa maalinta ka yar waxa loo isticmaalayaa sida balanka dhakhtarka. Kadib waxa taabanaysaa dir maqnaanshaha. Kadib waxad arkaysaa fariinta in aad dirtay kuu sheegaysa.

Hadii ilmahaaga uu sii wado xanuunnka, waa in aad maqnaanshaha ogaysiiskiisa soo dirtaa maalin kasta, ilaa ilmahaaga uu soo noqdo. Hadii ilmahaagu uu maqnaanayo



maalin dhan waxad ogaysinaysaa iskuulka iyo fritidshem ka labadaba. Hadii uu fritidshemka oo kaliya ka maqnaanayo dooro wakhtigaas oo kaliya kuna qor wakhtigii uu halkaas joogi lahaa.

- **Ogaysiiska maqnaansho hore:** Halkan waxaad ka arki kartaa maqnaanshihii aad adiga waalidka ahi hore u diwaan galisay sidoo kale halkan intood gasho ayaad ka masixi kartaa hadii aad rabto (taabo calamada waxa la tuuray) hadii aad si khalad ah usoo dirtay ogaysiis maqnaansho.
- **Maqnaansho la diwaan galiyay:** Halkan waax ka arki kartaa in iskuulku ilmahaaga warbixin ka diwaan galiyay maqnaanshihiisa sida in uu soo habsaamay iyo maqnaanshaha ogaysiis la'aanta ah.

### **Jadwalka Iskuulka**

Halkan waxaad ka arki kartaa jadwalka iskuulka ee ilamahaga. Tariikhda waxay ku tusaysaa xiisada iyo wakhtiga la galayo xiisad walba. Waad sii eegi kartaa si aad u aragto maalaha kale ama usbuucyada soo socda (sida usbuucyada la soo dhaafay iyo kuwa soo socdaba).